# MACLUUMAAD LOOGU TALAGALAY DADKA MAGANGALYO DOONKA AH OO JOOGA INDONESIA

**Waa maxay UNHCR-ta?**

Hay'adda Qaramada Midoobay ee Qaxootiga (UNHCR-ta) waxaa la aasaasey 1951 iyo waxa la siiyay hawsha ilaalinta iyo helidda xalal waarid ah ee qaxootiga adduunka oo dhan. UNHCR-ta waxay la shaqeeyneysa dowladaha si ay u bixiyaan ilaalinta qaxootiga iyo in la radiya xal waaritaan ah.

**Yaa qaxooti ah?**

Qaxooti waa qof kaso cararay/carartay dalkiisa / dalkeeda sababo cadaadis ah oo ku salaysan isaga / iyada: cunsuriyad, diin, dhalasho/qabill, ka mid ahaansho koox bulsho gaar ah, ama fikrad siyaasadeed. Qaxootiga way awoodan ama diyaar aysan u ahayn inuu ku soo laabto/laabata wadankiisa / eeda, maxaa yeelay dowlada oon awoodin ama aan diyaar u ahayn ilaalistiisa/teeda isaga / iyada ka baxsanayo cadaadis.

**Waa kuma magangalyo doonka?**

magangalyo doonka waa ruuxa/qofka soo codsaday qaxootinimo, laakiin aan weli helin go'aan lagu aqoonsaday isagu / iyadu qaxootinima.

**Sidee baan uga codsan karaa UNHCR-ta qaxootinima?**

Haddii aad rabtid inaad codsatid oggalaansho qaxootnima Indonesia, waxaad u baahantahay in aad buuxiso Foomka Codsiga RSD. Adiga iyo qof kasta oo qoyskaaga kamid ah (18 sano jir ama wixii kaween da'ahaan) waxaa looga baahan yahay in uu buuxiyo foom/arji u gaar ah, adigo sheegaya warbixin kooban oo ah sababta aad uga soo tagtay wadankaaga iyo sababta aadan ugu noqon karin. Wa in aad macluumaad run ah sheegtit. Haddii la ogaado inaad bixisay/sheegtay macluumaad been ah oo ku saabsan foomkan codsigaaga waa la diidi karaa. Dhammaan macluumaadka aad bixisay si qarsoodi ah aya loola dhaqmaya lalama wadaagayo cid saddexaad ama xubnaha kale ee qoyskaaga. Haddii aanad akhrin karin ama qori Karin , UNHCR-ta ayaa ku caawinaysa in aad buuxiso foomka/arjiga. Haddii aad murtaax kutahay in uu ku waraysta qof ad isku jinsi tihiin, waxaad ka codsani kartaa shaqaalaha diiwaangelinta ee UNHC-ta .

Marka aad buuxiso foomka/codsiga waxaad mari doonta wareysi isdiiwaangalin ah oo uu kula yeelan doona sarkaal katirsan UNHCR-ta asago arurin doonaa macluumaadkaga iyo faahfaahinta dacwadaada qaxootinimo, sawirkaaga,iyo farahaga ayu ka qaadi doona, iyo indaha(iskaan).

Ka dib wareysiga diiwaangelinta waxaa lagu siini doonaa Kaar Aqoonsi/warqad ah oo aya muddadiisu tahay laba sano, sidoo kale waxaa lagusiinaya warqad ballan wareysi labaad ah si loo ogaado in aad u qalanto qaxootinima . Sababta oo ah tiro badan dadka magangalyo doonka ah oo UNHCR-ta u imaanaya/iska qoraya , waraysigaga ugu yaraan wuxuu qaadan kara laba sano laga bilaabo taariikhda aad is diiwaan gelisay .

**Jakarta Diiwaangelinta waxaa la sameeya maalmaha isniinta - khamiista ka bilaabata 07:30**

**Wareysi go'aan ka qaadashada Qaxootinimo (RSD)**

Dhammaan xubnaha qoyskaaga waa in ay joogaan wareysiga iyo si gooni gooni ah ayaa lo wareysan doonaa. wareysiga ayaa waxaa ka qaadi doona Sarkaal u qalma oo kasocda UNHCR-ta . turjubaan aya laguu diyaarini doonaa haddii loo baahdo. Haddii aad weydiisatey in lagugu wareysto luqad gaar ah, ama sarkaal gaar ah oo isku jinsi ad tihiin , waynu isku daye doonnaa sida ugu fiican in aynu ugu hoggansanu codsigaaga. .

Inta lagu jiro wareysiga waxaad heli doonta fursad aad ku faahfaahisa sababaha aad uga soo tagtay/soobaxday wadankaaga iyo sababaha aadan u noqon karin. Waxaad u baahan tahay in aad sooqaada/keenta aqoonsi kasta oo aad u aragto in ay muhiim yihiin, oo ay ku jiraan/kamid yihiin waraaqaha aqoonsiga, taas waxay ka caawin karta dacwaddada. Waa in aad runta sheegta. beenta ama macluumaad haynta/qaris waxay saamayn xun kuyeelan doonta go'aankaaga.

Haddii aad leedahay/haysata aqoonsi taageeraya codsigaaga qaxootinimo, waa in aad la wadaagta UNHCR-ta sida ugu dhaqsaha badan. UNHCR-ta waraqaha asalka ah koobi ayay kala baxaysa si ay malafkaga ugelisa .

Dhammaan macluumaadka waxaa loola dhaqmi doona si qarsoodi adag ah . macluumaadka cid saddexaad lama siinaya adigoon ogolaasha lagaa helin, markii laga reebo xogta aassaasiga ah waxaa laga yaaba in lala wadaago maamulka Indonesia si aynu u wargelina joogitaankaga

Haddii aadan imanin waraysiga taariikhda laguu qabtay, fadlan sowac ama soo booqo UNHCR-ta muda lix todobaad ah gudahood, haddii kale faylkaaga wa la xiraya waxana la wargelini/ loo sheegi doonaa maamulka Indonesia .

**Maxaa dhacaya marka aan go'aanka helo?**

Dalabkaada qaxootinimo si fiican aya loo baari doonaa. UNHCR-ta si taxadar leh ayay uga fiirsan doonta qoraalkaga, iyo sidoo kale macluumaadka dalka aad ka soo jeedo. Waa lagu ogaysiin doonaa go'aanka UNHCR-ta sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah, laakiin taaas waxay qaadan kartaa waqti.

Haddii laguu aqoonsado qaxootinimo, Sarkaal ka katirsan UNHCR-ta ayaa kuu sheegi doonaa go'aanka iyo kuna siinaya macluumaad sharxaad oo qoraal ah oo kusaabsan waxa dhici doona.

Hadii codsigaaga magangelyo doonka ah la diido, waxaa laguu sheegi doonaa sababaha go'aanka si qoraal ah, iyo sidoo kale waxaad codsan kartaa la-talin faahfaahsan Sarkaalka UNHCR-ta. Haddii aad u malaynaysa in uu go'aankaan qaldan yahay, waxaad xaq u leedahay inaad racfaan ka qaadato 30 maalmood gudahood. Waxaa lagu siin doonaa foom si aad uqorta racfaanka. Haddii aadan racfaan ku qaadanin/ku soo gudbinin 30 maalmood gudahooda, filekaaga/malafkaaga waa la xiri doonaa iyo waxaa loo sheegi doona maamulka Indonesiana .

Haddii aad go’aanka rafcaan ka qaadatay , waxa laga yaabaa in waraysi lagula yeesha mar labaad oo aad la yeelata mid ka duwan Sarkaalkii hore ee UNHCR-ta. Go'aanka labaad oo aad kahelaysid UNHCR-ta wuxuu noqon doonaa go;aanka kama dambaysta ah. Haddii mar labaad lagu diida , kiiskaaga waa la xiri doonaa iyo UNHCR-ta ma awoodi doonto in ay kusii caawisa. .

**Wa Maxay xuquuqda iyo waajibaadkayga ee dalka Indonesia?**

Sida magangalyo doon, UNHCR-ta waxay mas'uuliyiinta Indonesian fari doonta in aysan ku musaafurinin dalkaaga hooyo. Waa in aad u hoggaansanta shuruucda Indonesia iyo xeerarka bulshada aadna ixtiraamta dhaqanka, iyo caadadka, . Haddii aad ku sameeyso fal dambiyeed wadanka Indonesia, wa lagu dacwaynaya laguna ciqaabi doonaa, si sharciga Indonesia waafaqsan UNHCR-ta ma faragelin doonto ama iskuma dayaysa in ay ka hortagaan xeer dambi haddii aad dembi gasho, laakiin waxan kuu gudbin doonaa ururada gargaarka ee sharciyeed matalaa dhinaca sharciga .

**UNHCR-ta indonesia dhaqaalo ma igu caawini doonta?**

<u>**OGAYSIIS MUHIIM AH**</u>

Sida waafaqsan sharciga Indonesian waxaa lagaga baahan yahay in aad iska diiwaan gelisa xafiiska deegaanka ee laanta Socdaalka ee degaanka aad degan tahay. Xeerarkaan wuxuu khuseyaa dhammaan muwaadiniinta Indonesian iyo kuwa shisheeye oo jooga Indonesia. tani wa adiga ilaalintada , iyo haddii aadan iska diiwaan galenin maamulka laga yaabaa in lagu qabto joogitaanka sharci-darrada ah ee dalka. Waxaa lagu siin doonaa buug gaar ah oo sharxaya habkaas .

UNHCR-ta dhaqaalaheeda aad ayuu u xadidanyahay si ay u bixiyaan/siiyaan gargaar dhaqaale magangalyo doonka iyo qaxootiga inta ay joogaan Indonesia. waxa la cawin kara keliya dadka nugul. Tirada ka-faa'iideystay gargaarkan waa mid aad u kooban oo ku tiirsan yahay/xirantahay maal gelinta la hela.

**Maxaa dhacaya haddii aan qabo dhibaatooyin caafimaad?**

Dhammaan magangalyo-doonka iyo qaxootiga waxay heli karaan daawayn caafimaad oo qiimo-jaban goobaha caafimaadka dowladda ay maamusho (oo loo yaqaan 'Puskesmas'). Wixii macluumaad dheeri ah Fadlan tixraac/raajici buug yaraha UNHCR-ta ay bixiso .

**ma heli doona xal waara?**

UNHCR-ta ayaa loo xilsaaray in ay u hesha xal waaritaan ah oo loogu talogalay qaxootiga dunida. Waxaa jira saddex xal oo waarta ah : unoqosho iskaga ah dalkagii hooyo, isdhexgalka deegaanka ah ee dalka aad martida utahay, iyo dib u dejin wadan saddexaad.

<u>Dib u dejinta ma ahan xaq si toos ah ay u heli karaan dhammaan qaxootiga</u>. Dib u dejinta waa xal ay khuseysaa keliya qaxootiga ku jira xaalado gaar ah, iyadoo mudnaanta la siinaya kuwa loo go'aamiyo in ay aad unugul yihiin ama ubahan ilaalin gooni ah. dib u dejinta waxba shaqa kuma laha waqtiga/mudada aad joogtay Indonesia. <u>Sidaa darteed waa inaad fahanta, aadna oggolaata in laga yaaba in aad marnaba awoodin in ad ka faa'iideysata dib u dejinta ka jirta Indonesia</u> , waa in aad tixgelisaa dhamaan fursadaha kale ee aad heli karto, oo ay ku jirta/ka mid tahay in aad ku laabata dalka aad ka soo jeedo haddii aad si ammaan ah u samayn kartit/ku noqon kartit. waxaad imaan karta xafiiska UNHCR-ta ee Jakarta jimca walba/ kasta haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan prosseska dib u laabasho ah dalka aad ka soo jeedo .

**Sidee ayaan ku heli kara warbixin ku saabsan xaaladda kiiskeyga?**

UNHCR-ta ayaa soo saartay hormarin ah online oo ku ogolaanaya si aad u hesho faahfaahin aasaasiga ah ee xaaladda kiiskaaga:

<u>**http://services.unhcr.or.id**</u>

UNHCR-ta ayaa sidoo kale <u>waxay bixisaa latalin</u> xafiiska Jakarta Talaado illa iyo khamiisaha ka bilaabata 13:00- 16:00.

Fadlan la soco in aan laguu hubsan karin/ balan qaadi karin in uu jiri doona/joogi doona turjubaan ku hadlo afkaaga, sidaas darteed haddii aad ku hadli karin Ingiriisiga ama Bahasa Indonesia waa in aad soo ka xaysata qof kaa caawin kara inaad la xiriirta UNHCR-ta.

UNHCR-ta ayaa sidoo kale waxay bixisaa latalin taleefoon ah jimca kasta inta u dhaxaysa 14:00 -17:00 Nambarka la wacayaa/kaso wacaysid waa:

**+62(21) 2964 3665**

UNHCR-ta Waxaad kalso xiriiri kartaa/uguso qori kartaa cinwaanka hoosta ku qoran si ay kuu siiyaan macluumaad ku saabsan dacwadaada/kiiskagaa, laakiin sababta oo ah tirada waraqaha badan oo aan helno/nasogaara ma awoodnaa in aan ka jawaabna dhamaan weydiimaha su'aalaha. Fadlan ha usoo qorin UNHCRT-ta waraaqa sonoqnoqod ah taasi waqti ayay ka qaadanaysa prosseska kiiska.

**Maxaa dhacaya haddii aan cabasho qaba?**

Haddii aadan ku qanacsanayn habka arrintaada ay u maareeysi UNHCR-ta, waxaad soo gudbin kartaa walaac/cabasho qoraal ah oo aad kuridi kartit sanduuqa iqtiraxyada/soo jeedinta oo kuyala soo dhaweynta xafiiska UNHCR-ta ee Jakarta . UNHCR-ta Waxa kale oo aad ku usoo gudbin kartaa walaacada/cabashadada adigo isticmalaya e mail ama fakis (faahfaahinta xiriirka hoos ayay ku qoran tahay). Fadlan la soco in ay ku adag tahay UNHCR-ta si ay u qaado tallaabo ku saabsan cabashooyinka aan magaca laheen/ cabashooyin qarsoodi ah.

Dhammaan adeegyada ay bixiso UNHCR-ta waa lacag la'aan/bilaash. Tani waxaa ka mid ah helitaanka diiwaangelinta, wareysiyo, dukumeentiyada UNHCR-ta, iyo xal waara . Waxaad xaq u leedahay in aad heshaa dhammaan marxaladahaas si aan takoor lahayn iyo aan lagu weydiisanin lacag caddaan ah ama si nooc kala. Ka qadaashada lacag baad ah ama codsi axsaan/ixsaan oo la waydiista magangalyo-doonayasha iyo qaxootiga gebi ahaanba wa mamnuuc iyo ciqaab waafaqsan sharciga Indonesia. Haddii xubin ka mid ah shaqaalaha UNHCR-ta, turjubaanka, ama waardiyaha uu ka codsado in aad wax ku bixiso adeegyada UNHCR-ta, fadlan si degdeg ah isla markiiba ugu soo sheeg UNHCR-ta.

**UNHCR Indonesia**
**Menara Ravindo**
**Jl. Kebon Sirih Kav.75**
**Jakarta Pusat**
**Telephone counseling: 021-2964 3665**
**Fax: 021-2964 3601**
**Email: insja@unhcr.org**

**Lambarada muhiimka ah**
Booliiska 110
Dabdamiska 113
Ambulance 118